**BARWAAQO SOORANKA MASSACHUSETTS**
**XAFIISKA MAAMULKA ADEEGYADA CAAFIMAADKA IYO BANIAADAMKA**
**Waaxda Adeegyada Koboceed**
**Qaybta Otismka**
**40 Broad Street, 4th Floor, Boston, MA 02109**


Seteembar 2025

Waalidka ama ka Masuulka Qaaliga ah,

Sidaa ula socotid, Qaybta Otismka ee hoos timaado Waaxda Adeegyada Koboceed (DDS) ayaa maamushaa barnaamij logu talagalay **ilmaha qoysaska dakhliga yar ee leh otismka** ee loo yaqaano **Barnaamijka Ka Cafinta Shuruuda Otismka Ilmaha**. Barnaamijkan wuxuu u adeegaa ilmaha **da'dooda ka hooseyso 10 jir** oo fuliyo shuruudda u qalmitaanka lacageed iyo caafimaadeedba, taasoo ku jirto shardiga in la helay ama la helaayo Caymiska Caadiga ee MassHealth. Xiligan la joogo Barnaamijka Ka Cafinta Shuruuda Otismka Ilmaha ayaa u adeegi karaa taqriiban 500 ilmood sanadkiiba. Barnaamijka wuxuu boos u reebaa (50 boos oo degmada dhan) ilmaha da'doodu tahay 3 oo ka gudbayaan Farogelinta Xiliga Hore. Dhammaan adeegyada ka cafinta shuruudda waxay shardi yeelaan inuu cunuga marwalba fuliyo shuruudda u qalmitaanka lacageed iyo caafimaadeedba ee Barnaamijka Ka Cafinta Shuruuda Otismka intay ku jiraan barnaamijka. Waxaa jiraa dad badan ee ka gudbaan Barnaamijka sanad walba; sidaa darteeda, waxaanu ka xulannaa liiska Codsiga Furan sifo aanu buuxinno boosaska bannaan.

Maanta, waxaanu codsanaynaa inaad naga caawiso faafinta warkan ku saabsan Barnaamijka Ka Cafinta Shuruuda Otismka Ilmaha **Xiligiisa Codsashada Furan** ee soo socda. Qaybta Otismka ayaa **aqbali doontaa codsiyaalka cusub** ee ka imaanayo qoysaska danaynaayo Barnaamijkan taarikhda u dhexeyso **Oktoobar 17, 2025, iyo Oktoobar 31, 2025**. Codsiyaalka waa waajib inay leeyihiin shaabada boostada ama iimayl uu waalidka ugu soo diro iyadoon ka dib dhicin Oktoobar 31, 2025.

Cafinta Shuruudda tan ee Adeegyada Guriga iyo Bulshadda Ku Salaysan waa Barnaamij Medicaid ee logu talagalay in lagu bixiyo adeegyo lagu caawinaayo ilmaha otismka leh sifo ay guriyohooda ugu sugnaadaan iyo si firfircoon ugala qayb galaan qoysaskooda iyo bulshadooda. Barnaamijkan wuxuu maalgelin bar ka mid ka helaa dawladda federaalka. Adeegyada ka cafinta shuruudda ayaa kordhin ku ah adeegyada waxbarashada gaarka ah ee hoos yimaado IDEA (Qaanuunka Waxbarashada Dadka Laxaad La'aanta Leh.) Iyadoo caawinaad laga helaayo Barnaamijka, qoys walba waxaa laga rabi doonaa inay shaqaalaysiiyaan xirfad yaqaane oo u dejiyo Qorsho shakhsi logu talagalay ee Taageeraha Dabeecadda Wanaagsan, oo ku salaysan tusaale daawayneed ay doorteen qoyska, sifo loo taageero baahiyaalka ilmohooda la qiimeeyey, iyo loo shaqaalaysiiyo shaqaale taageerka tooska oo bixiyo adeegyada tooska ee lagu dejiyay Qorshaha. Qoysaska qaybta ka ah Barnaamijka ayaa sidoo kale fursad u heli doono inay doortaan adeegyo kale ee ka cafinta shuruudda sida hawlaha ka qayb yeelidda bulshadda, tababarka qoyska iyo nasashada, kuwaasoo logu talagalay inay ka caawiyaan ilmohooda inay ka kobcaan qaybaha la xiriira dabeecadda, xirfadaha bulshadeed, iyo isgaarsiinta.

Koobiga Codsashada Xiliga Furan ee Barnaamijka Ka Cafinta Shuruuda Otismka Ilmaha iyo Guud Marka Qoyska Xiliga Codsiga Furan waxaa lagu lifaaqay Ingiriis. Foomka codsiga, ogeysiinta qoyska iyo xogta la xiriirto (ee dhawrka luuqadood*) ayaa sidoo kale laga heli doonaa bogga DDS halkan www.mass.gov/DDS iyo todobada Xaruun goboleed ee Taageeraha Otismka (liiska Xaruumaha waxaa laga heli karaa bogga DDS). Sidoo kale codsiga waxaa si buuxdo logu samayn karaa qaab online link-gan: Muujinta Danaynta Codsiga Furan ee AWP 2025. Fadlan si toos kala soo xiriir Qaybta Otismka halkan AutismDivision@mass.gov ama Xaruuntaada deegaanka ee Taageeraha Otismka haddaa wax su'aalo ka leedahay geedi socodkan codsashada.

Si daacadnimo leh,

Mary Kate Haswell
Maamule Barnaamijka Ka Cafinta Shuruuda
Otismka Ilmaha

Stephanie Coburn
Maamule Barnaamijka Ka Cafinta Shuruuda
Otismka Ilmaha